Ilxaadka cusub

Waxaan dhammaanteen wada xusuusannaa mar aan fogeyn in la dhihi jiray: Soomaalidu %100 waa Muslimiin, hadda haddii aad google garayso waxaa kuu soo baxaya xogtaas mid ka duwan, waxaa noo qoran %99.7! Macnaheedu waa in %0.3 ay diinta ka bexeen. Inkastoo lanbarkaasi ka badbadis yahay, oo haddii aan dhahno Soomaalidu waa 16M, %0.3 waxay u dhigantaa ku dhowaad 50K, mana ahan tiro maangal iyo wax u dhow toona ah. Markaan sidaas leeyahay waan ogahay inaysan jirin cid si dhab ah u sheegi karta tirada Soomaalida ah ee diinta ka baxday, waayo inta qarsoon ayaa ka badan inta muuqata. Hayeeshee inta muuqataahi waa tobaneeyo, inta qarsoonna haddii aan boqolaal ama dhawr kun ka dhigno weli lanbarkaas uma dhowin.

Waxa muhiimka ahse ma ahan tiradooda hadda, ee waa qaabka ay wax u socdaan, muslimiintuba mar ayay hal iyo labo qof ahaayeen. Haddii aan maanta laga baaraandegin oo dhoohanaantaan aannan iska beddelinna, maalin aan waxba laga qaban karin baa taladooda la isla soo qaadi doonaa! Hadalkaasi ma ahan cabsigelin, ee sideedaba isbeddellada taariikheed ee waaweyni —markii kacdoonnada laga reebo— intooda kale lama dareemo, si deggen oo aan lagu baraarugin ayay u dhacaan, hadhow markii gadaal loo soo fiiriyo ayaa la yiraa: "Alleylehe maalin hebla ayay qabasho lahayd" waana meesha uu taariikhyahan Roland N. Stromberg ka lahaa: *"Berridu waxay lamahuraan u tahay si aan maanta u fahanno! Waana sababka keliya ee taariikhda loo diiwaangeliyo"* Waa run, berri marka la gaaro ayaa wixii maanta dhacay si fiican loo fahmaa.

Waxaan marnaba shaki ku jirin in hirarka ilxaadku ay sidii dabgubato ugu faafayaan dhallinyaradeenna dhexdooda. Haddaba, waxaa nala gudboon inaan isweyddiinno: maxaa keenaya in ilxaadku sidaan noogu dhex faafo?!

Marka horese, culimadeenna waxaan ka barannay, markii ay kitaab qorayaan in ay bogga u horreeya ku sheegaan faa'iidada laga dheefayo barashada kasmada uu kitaabkaani ku saabsanyahay (ثمرته) si qofka akhrisanaya uu usii wadi karo.

Qormadaan iyo kuwa ka danbeeya ee iyada la socda si aadan ugu luggo'in, waxaad xaq u leedahay inaad i weyddiiso: maxaan ka dheefayaa ogaanshaha sababaha ilxaadka?

Waxaan ka dheefaynaa dhawr walxaato:

• Cudur aan sheybaarkiisa la helin dawadiisa lama helo. Haddii aan rabno inaan dhallinyarteenna uga gaashaan xirno ilxaadka, inta godka ku dhacdayna ka soo badbaadinno waxaan ku qasbannahay inaan wax ka ogaanno sababaha keena ilxaadka.

• Inaan ka gudubno aragtida duqda ah ee nagu qafilan, ee halka sabab taqaan, ee ah: lacag darteed bay u gaaloobeen! Taas oo xalka dhabta ah na hareer marsiinaysa, xaaladda jirtana naga indhatiraysa.

• Inaan ogaanno sababaha ilxaadka inaan annagu qayb ka nahay mararka qaarkood, taas oo nagu dhalinaysa inaan dib isugu laabanno, oo habdhaqankeenna toosinno.

Waxaan ka sii afeefanayaa:

• Sabab u yeelidda ilxaadku marnaba kama dhigna "u qiil bixin" iyo inaan leeyahay: maadaama sababkaasi ku kallifay xaq buu u lahaa inuu gaaloobo!

• Sababaha aan sheegi doono, khasab ma ahan qofka mulxidka ah inay ku wada kulmeen, ee hal ama labo sabab oo ka mid ah ayaa galaafan kara.

Intaa ka dib. Runtii, aqoonyahannada galka ilxaadka furay sababo badan ayay u sheegeen. Sababo aqooneed, kuwo nafeed, kuwo bulsheed Iwm. Waxaa jira sababo la wadaago goob kasta oo la joogo iyo kuwo deegaannada qaar ku gaar ah, waxaan soo xuli doonaa inta aan akhriyay kuwii aan is iri: dadkeenna iyo deegaankeenna way khuseeyaan.

Sababka koobaad: Kalnugayl iyo kadeedka nolosha oo isbiirsaday!

Aadanuhu isku adkaysi ma ahan, isku si na ugama falceliyo xaaladaha la soo dersa, qof ayaa dhibaatada ku dhacdaahi xagga Alle u celisaa, qofna intuu canceenada rabbi ka quusto, qaddarta u caroodo, ayuu gaaloobaa, sidatoo uu Alle ku nacaynayo. Waa sida waagii aan carruurta ahayn aan cunnada u diidi jirnay markii hooyo na xanjafiso! Waa habfikir carruureed.

Qof ayaa marka horeba diinta fikir khaldan ka haysta, wuxuu ku wataa dano adduunyo, haddii uu hanti iyo barwaaqo helo asaga oo muslim qanacsan ah ayuu joogayaa. Haddii uu heli waayana wuxuu hoosta ka xarriiqayaa in diinkaani uusan diin saxanba ahayn! Habfikirka noocaas ah ee nafciga ah, ee isku xiraya sida noloshu kuu soo wajahdo iyo xaqnimada waxa aad aamminsantahay hadda ma uusan bilaaban ee weligii wuu jiray. Waxaan arkaynaa bilowgii islaamkaba in dad noocaas ahi soo ifbaxeen. Xilligii nebiga scw waxaa dhici jirtay in nin intuu soo islaamo oo soo qaxo, uu Madiina yimaado, ka dibna wuxuu qiimayn jiray jeebkiisa waxa iska beddelay! Haddii uu baraaro wuxuu dhihi jiray: diinkaani waa diin barakaysan! Haddii ay is bixin weysana intuu guryolaabto diinkana ka baxo ayuu dhihi jiray: diin ka xun weligey ma arkin! Waa kan Quraanku nooga warramayo suuratul xaji ayaadda 11aad: *"Dadka waxaa ka mid ah mid meel gees ah Alle ku caabbudaya (diintaba hal lug buu kula jiraa) haddii uu barwaaqo helo wuu ku xasilaa diinta!*

Haddii dhamac yar la taabsiiyana wuu kala wareegaa! Adduun iyo aakhiraba wuu tacabbeelay kaasi, khasaare iska cad haddaad maqasho waa kaas uun"

Sababka labaad: Qalbi engeg!

Insaanka labo wax ayaa xakameeya, midi waa aqoontiisa, midina waa balwaddiisa (waxa uu jecelyahay). Labadoodu haddii ay is qabtaanna balwadda ayuu tixgelinta koobaad siiyaa. Sow ma aadan arkin dhakhaatiir aqoon sare u leh caafimaadka, misna cunaya ama cabaya waxyaalo ay ogyihiin in ay caafimaad u daranyihiin? Sow ma aadan arkin wadaaddo aqoon sare u leh diinta, misna maal iyo mansab la siiyay dartood ugu tumanaya xeerarkii diinta? Ama luqunjibbaaraya oo halkii ay rabeen u leexsanaya? Dabcan waan aragnaa maalin kasta, maxaa wacay? Waa aqoontoodii iyo balwaddoodii oo iska hor yimid, balwaddii ayayna raaceen. Ka warran qofka iimaanku balwad u noqdo? Sow wax walba ka doorbidimaayo? Xaddiis saxiix ah waa kii ahaa*: "Saddex tilmaan qofkii isku arka wuxuu dhedhemiyay macaanka iimaanka…. Waxaa ka mid ahaa: in dab lagu tuuro inuu ka jeclaado intii uu gaaloobi lahaa!"* U fiirso, waa qof iimaanku balwad u noqday (macaansaday), sidaa darteed wax uu siisanayo ma jiraan.

Dadku waa afar qaybood:

1. Qof aqoontii diineed iyo iimaankii oo balwad u noqday isku darsaday, qofkaas way adagtahay inuu diinta ka baxo.

2. Qof iimaanku balwad u noqday (macaansaday) balse aan aqoon diineed lahayn, asna way adagtahay in la gaaleeyo.

3. Qof aqoon diineed leh, balse aqoontiisa iyo ku dhaqankiisu kala danbeeyaan, oo aan iimaanka macaansan. Ma adka inuu gaaloobo.

4. Waa qof aan aqoonna u lahayn diinta, balwad iyo macaansina aan ku haysan! Kaasi haddii uu gaaloobimaago wax celinaya ma jiraan, labadii xakame ee aadanaha celin jirtayba wuu ka xarig la'yahay. Dadka gaaloobana intooda badan waa noocaan danbe.

Intooda badan waa noocaan danbe? Warkaas ma anigaa iska iri? Maya, ayaga ayaa yiri. shabakadda EXMNA -oo ah urur u dhaqdhaqaaqa arrimaha dadka muslimiinta ahaan jiray ee gaaloobay gaar ahaan kuwa Maraykanka ku nool- ayaa war bixin ay soo saareen 3 bilood ka hor, oo 65 bog ka kooban waxay ku sheegeen in: dadka diinta islaamka ka baxay ee ay waraysteen %53 ka mid ahi ay dhillaysan jireen markii ay muslimiinta ahaayeen. %79 ka mid ahna aysan salaad foodda dhigi jirin. %48 na ay maandooriye isticmaali jireen, %7 na ay hilibka doofaarka cuni jireen! %16 ay khaniisiin ahaayeen! Gabdhuhuna %96 aysan xijaaban jirin. Waa qirasho ayaga afkooda laga yeersiiyay, markhaati kale uma baahna.

Halkaas markaad marayso waxaad si fudud u fahmi kartaa oraahdii caanka ahayd ee culimadu nagu celcelin jireen ee ahayd: “Macaasidu waa farriinsidaha gaalnimada المعاصي بريد الكفر”

Sababka sadexaad: kadsoonka aqooneed.

“Aqoontu waa saddex tillaabo, qofku tillaabada koobaad marka uu qaado wuxuu is moodaa inuu wax walba yaqaan, sanka ayuu taagaa, wax walba ayuu ka hadlaa, mana u maleeyo fanni soo celi kara inuu jiro! Waxaa lagu mataalaa koonbo hal dhagax ku jiro, wax ka dhawaaq iyo qaylo badan lama arko. Tillaabada labaad marka uu qaado wuu is gaabiyaa, wuxuu ogaadaa in moolka aqoontu intaan ka gun dheeryahay, aashiisa ayuu socdaa, wax badan oo ka dahsoon inay jiraan buu ogaadaa, arrimo badan oo uu xuf iyo xaf kala siin jiray ayuu gacanta ka taagaa. Tillaabada saddexaad markuu gaarana wuxuu ogaadaa inuusan waxba aqoon! waxyaalaha uu ka aammusayo ama uu cid uga aqoon roon ku leexinayo ayaa ka badnaada kuwa uu ka hadlayo.”

Halkaan ayay imaanaysaa oraahdii caanka noqotay ee Sheekh Nadiim Al-jisri AUN: *“Falsafaddu waa bad aan badaha la mid ahayn, qofkii xeebteeda ku dabaasha wuu dhintaa, kii moolkeeda taga ayaa badbaada” xaqiiqaduna waa in culuumta oo dhan ama badankeed ay sidaas tahay, ee aysan falsafadda keliya ahayn.*

Tusaalayaalka layaabka leh ee ku saabsan dad kalsoonida iyo kadsoonka aqooneed meel xun ka tuureen, hadallo lagu qoslana ka keeneen waxaa ka mid ah: nin yiri: waxaan naqdinayaa kitaabka saxiixul bukhaariga ayaa wuxuu yiri: “Kitaabkaan waxaa qoray jumca Muxammad Ismaaciil!” kitaabka jaldigiisa ayaa wuxuu ku arkay "jamacahu Muxammad Ibnu Ismaaciil" "Jamacahu= waxaa uruuriyay Muxammad Ismaaciil" wuxuu u akhriyay jumca oo magac qofeed ah! Ninkaasi TV ayuu fadhiyaa, wuxuu naqdinayaa kitaab uusan xataa qoraagiisa aqoon, wuxuu fatwoonayaa in khamradu xalaal tahay! Dad buu sheekh u yahay! Waaba Ditoor, Phd holder si kale uma taqaannide!

Waxaa la mid ah, gabar ka hadlaysay kitaabka Sunan Annasaa’i, waxay tiri: Kitaabkaan waxaa la yiraa: Sunan Annasaa’i, wuxuu ka hadlayaa arrimaha dumarka!! Sheekadaas anigoo samays u haysta, ayaan la kulmay gabar tabtaas dhahaysa!

Sida aad ogtahayna, inaad aqooto kitaab magaciis iyo qoraagiisa waa wax aan juhdi iyo barasho u baahnayn, waana arrin ogaalkeedu wax badan ka horreeyo akhriska kitaabkaas. Inta kitaab ee aan magacooda naqaan welina aannan akhrin ayaa ka badan kuwa aan akhrinnay.

Dhaqankaas (kadsoonka iyo kalsoonida aqooneed) asaga oo awel aadanaha oo dhan ka dhexeeyay, ayuu Soomaalida dhexdeeda wuxuu ka helay qalbi carrosan ah oo uu si fudud ugu bulaali karo. Wuxuu helay dad u nugul kibirka iyo isqaadqaadka. Dadkeenna kii labo kitaab oo fiqi ah akhrista wuxuu usoo fadhiisanayaa inuu salaaddaada iyo soonkaaga ku buritaan xugmiyo! Ganacsigaaga ku xaaraannimo xugmiyo! Kii labo kitaab oo caqiiddo ah akhrista islaannimada dhan ayuu 'kick' kaa dhahayaa, oo weliba 'Ban' kuu raacinayaa sidii qol Nimbuzz ah oo uu asagu samaystay. Kii labo kitaab oo midi riwaayad yahay, kan kalena sida raajixa ah falsafad yahay soo akhriya, tinta intuu kuu soo deysto oo koob qaxwe xaraar ah kula soo ag-fadhiisto, ayuu caqligaaga iyo kan sinjigaaga sawracaagaba caayayaa! Midka aan weligiis gobolkiisa dhaafin haddii uu maqlo eray Af-soomaali ah oo aan gobolkiisa laga adeegsan wuxuu si fudud u dhahayaa: waxaasi Af-soomaali ma ahan!

Kadsoonka aqooneed iyo isku kalsoonaanta xa dhaafka ahi waa arrin bulshadeenna aad ugu dhex baahsan. Qofkeen kama sarriiganayo inuu bogga u garaacdo mawduuc kasta oo la soo hadalqaado, kuma dhaco inuu dhaho: mawduucaan wax xog ah kama hayo!

Qofka dhaqanka noocaas ah leh, ee aqoontiisa iyo caqligiisa sida xad dhaafka ah ugu kalsoon, markii uu bushi-la-mood (shubho) diineed arko, lagama dhaadhicin karo in shubhadaan laga jawaabay, ee uusan asagu arkin jawaabta, xataa haddii la tuso jawaabteeda kuma qancayo, waayo? Wuxuu ka santaagayaa in cid aadane ah oo asaga caqli iyo cilmi ku soo kordhin kartaa ay jirto!

﴿إِنَّ الَّذينَ يُجادِلونَ في آياتِ اللَّهِ بِغَيرِ سُلطانٍ أَتاهُم إِن في صُدورِهِم إِلّا كِبرٌ ما هُم بِبالِغيهِ ...﴾ [غافر: ٥٦]

“Dadka aayadahayga murangalinaya, ayaga oo aan haysan wax xujo ah oo ay ku buriyaan, wax aan kibir ahayn qalbigooda kuma jiro, mana ka salgaarayaan....” Suuratu Qaafir [56]

Dawadu waa inaad marka hore dhaqankaas kibirka ah qalbigaaga kala dagaallantaa, inaad ogaato in lagaa aqoon badanyahay, lagaa caqli badanyahay, aysanna kaa waalin qoraallada dhiirrigelinta ah ee dadka kalsoonida xad dhaafka ah galiya. “Isku kalsoonow, qof wax ku dheer ma jiro, naftaada aammin” Iwm.

Sababka afraad: Afjigitaanka weyddiimaha.

Maktabadda carabiga ah ee islaamiga ahi maanta waxay la ciirciiraysaa buugaagta fikirtoosinta ah, bushibixinta ah, iyo kuwa naqdinta afkaarta doolka ah. Hayeeshee, Soomaali ahaan cillad baa dhankaas naga haysata, oo mawduucaas cid Soomaali ah oo wax ka qortay ilaa hadda ma arkin anigu.

Maktabadda Soomaalida oo naga dhabiishay buugaagta fikirtoosinta ah awgeed, qofka aan luqadda carabiga aqoon, amase yaqaan, balse kutubta mawduucyadaan laga qoray aan war u hayn, wuxuu ku khasbanyahay markii diintiisa shaki looga furo inuu waalidkiis ama wadaad xaafadeedka masjidka u dhow jooga miciinbido, taasoo asaga uga dhigan inuu meeshii ugu mudnayd la tiigsaday su'aashiisii, marar badanna waxaa dhacda in qofkaas la afjigo, oo la dhaho: "War naga aammus gaalyahaw! Ma diintii baad ka baxday? Maxaad ku hadlaysaa?!"

Qof diintiisa jecel, wanaaggeeda raba, aan dulduleed in lagu sheego qaadan karin, markii dulduleel looga sheego uuna ka jawaabi waayo, meeshii uu la ciirsadayna laga soo cayriyay, muxuu u fahmi karaa?! Wuxuu iska dhaadhicinayaa in diintu dulduleelladaas oo miiran tahay, lana doonayo in sidii miro daray duudduub loo laqo, qofkii isku daya inuu findhixiyana la cayrinayo! Su'aalihiisuna aysan jawaabba lahayn!

Halkaasna albaab weyn oo shaki ah baa qofka ku furmaya, taasoo keeni karta inuu toos uga baxo diinta.

Sababka shanaad: aabbaha doorsoon!

Paul Vits, oo ah macallin Cilmu nafsiga ka dhiga jaamacadda Newyork, oo labaatan sano mulxid ahaa, ka dibna ka soo baxay, wuxuu qoray kitaab uu ku magacaabay *"Psychology of atheism"* macallinku wuxuu qabaa in waxyaalaha ilxaadka keena aysan ahayn sababo mandiqi ah, iyo su'aalo si dhab ah qofka u wareeriyay! Ee ay yihiin sababo nafsi ah, sababahaas nafsiga ah ayaa qofka u bisleeya inuu mulxid noqdo, sababaha kale ee uu asagu afka ka sheegto ee caqliga ahna marmarsiyo ayuu ka dhigtay! "Anoo boor injeedo Sa' dubshe iidhooshi"

Sababahaas nafsiga ah ee uu sheegay waxaa ka mid ah: aragtida aabbaha doorsoon.

Aragtidaan nuxurkeedu wuxuu yahay: dadka qaar ayaa Ilaahey waxay ka aamminayaan sidii inuu yahay aabbe cirka jooga! Sidaa darteed haddii aabbihii caadiga ahaa ee dhulka joogay uu xumaado (sida inuu qallafsanaado) ama ay aabbe waayaanba (wacal) waxay sidoo kale nacayaan Ilaahey oo ay ka aammineen aabbe cirka jooga!!

Dhanka kale, qofku marka uu yaraantiisa waayo daryeelka iyo xannaanada aabbe, waxaa doorsoomaya fidradiisa, taasoo gaarsiinaysa markuu weynaado inuusan dareemin daryeelkii Alle. Ka dibna uu noqdo canug aan jixinjixin abaalna aan aqoon, oo Ilaahey inkira.

Wuxuu Paul Vits markhaati gashanayaa waaqica, waxaa muuqata in dadka ugu badan ee mulxiddiinta noqda ay yihiin dad aabbayaashood ay xumaayeen, kuwo aabbahood uu dayacay ayagoo yaryar, kuwo si xun loo jajuubi jiray, kuwo hooyadood la furay oo aabbahood aanba wax badan arkin, iyo kuwo wacallo ah oo aan aabbeba lahayn. Wuxuu tusaale ahaan usoo qaatay mulxiddiintii caanka ahayd: Feuerbach, Karl Marx, Voltaire, Freud iyo Hitler. Dhammaantood waxay ka soo tooseen guri aabbuhu ka xumaaday!

Aragtida Paul Vits iyo tusaalihiisa haddii aan labo u kala qaadno, tusaaluhu waa wax jira, oo aan la inkiri karin, tirana ma leh inta qof ee mulxiddiinta noqday oo markaad gurigooda fiiriso aad ogaanayso inay ku soo koreen guri aabbe xumo ka dhacday.

Aragtidu ma saxantahay? Ka garnaqiddeedu waxay u baahantahay aqoon dheeri ah, si gaar ah qof cilmu nafsiga yaqaan. Ciddii nagu dhaanta ayaa saxiixin doonta ama bushin doonta.

Haddii aragtidaani sax noqoto, dhallinyaro badan oo Soomaaliyeed inay mulxiddiin noqdaan layaab ma yeelanayso, aabbayaalka carruuraha dayaca oo nagu badan awgeed.

F.G:Marka aan ka hadlayo kadsoonka aqooneed, macnaheedu ma ahan inaan anigu sheeganayo inaan aqoonta meeshii u sarraysay ka gaaray! Maya, waan is ogahay inaan cilmi iyo caqliba bilow saa’id ah ahay, balse ugu yaraan waan is ogahay inaan bilow ahay.

Sababka lixaad: Awoodda Galbeedka iyo Tabaryarida Muslimiinta.

Aasaasihii Cilmiga Bulshada Ibnu Khalduun AUN wuxuu muqaddimadiisa caan baxday ku sheegay qaaciddo kitaabkaba ka caansanaatay, taas oo ah: “Qofka laga adkaaday weligii wuxuu iska dhigdhigaa oo isu ekaysiiyaa cidda ka adkaatay, wuxuu isaga ekaysiiyaa xagga lebbiska, gaadiidka, hubka, iyo dhan walba”

Qaaciddadaas waxaa keligeed kitaab ka qoray Ibraahiim Sakraan, kitaabkiisa "سلطة الثقافة الغالبة" dhammaantiis qaaciddadaas ayuu ku dulwareegayaa, oo tusaalayaal badan ka bixinayaan.

Aadanuhu weligiis wuxuu jecelyahay dhanka awoodda iyo dhammaysnimadu ka xigto, wuxuu necebyahay nusqaanta iyo jabku dhanka ay ka jiraan, kooxda lagu tiriyo haddii jab soo gaaro yaxyax buu dareemaa, haddii jabkaasi sii joogteeyana inuu tartiib uga haro kooxdaas ayuu damcaa.

Taariikhdu weligeed sidaas bay ahaan jirtay, ahaanna doontaa, hadba qoladii laga saayidcaleeyo ayaa qolada gacanta sarraysa iska dhigdhigi jirtay, berigii Muslimiintu awoodda lahaayeen carruurta galbeedka waxaa laga yurayn jiray isu ekaysiinta Muslimiinta!

Qoraayadda jarmalka u dhalatay ee mustashriqadda ah Sigrid Hunke oo ah gabar inta badan si caddaalad ah uga hadli jirtay arrimaha Islaamka iyo Muslimiinta, waxay qortay kitaab ah ku magacawday *"Ilaahey sidaas ma ahan!"* oo ay Muslimiinta iyo taariikhdooda ku difaacayso, waxay soo rartay wadaadkii kirishtaanka waddanka Spain u sarreeyay oo calaacalaya xilligii Muslimiintu dhulkaas ka talinayeen, wuxuu leeyahay: “In badan oo dhallinyaradii diinteenna ka mid ah maanta waxaa laga kari la’yahay akhrinta sheekobaraleyda carabta, kutubtii Muslimiinta ayay baranayaan, uma akhrinayaan inay raddiyaan, ee waxay u akhrinayaan inay luqadda carabiga taf ku noqdaan, maanta xaggee laga helayaa qof kirishtaan ah oo akhrinaya tafaasiirta baybalka? Alla shallayto badanaa! Maanta dhallinyaradii kirishtaanka ee hibada lahaa oo dhan luqadda carabiga iyo suugaanteeda ayay ku daateen, awooddooda dhan waxay isugu geeyeen barashada carabiga! Hanti badan bay ka bixinayaan soo iibsashada kutubta carabta, waxay meel kasta la taaganyihiin ammaanta luqadda carabiga, qofkii isku daya inuu kula doodo xujooyinka kutubta kirishtaanka ku qoranna si yasmo leh ayay ugu jawaabayaan! Waxayna af cad ku sheegayaan in kutubtaas aysan wax xiiso ah u hayn. Alla musiibo weynaa! Maanta kirishtaanku xataa afkoodii hooyo ayay halmaameen, kunkii qofba lagama heli karo hal qof oo laatiin wax ku qori kara, halka aan helayno tiro ciiddaas ka badan oo carabiga ku gabyi kara, ilaa ay carabtii asalka ahayd ka badiyeen!”

Sunnada taariikhda ayaa sidaas ah, in bawdyaha raggu midba maalin qawnaato, balse qofka aan taariikhda aqooni waa jiir haan ku weynaaday. Uma adkaysan karo maalinkii laga sito.

Sidaas marka ay tahay, qarnigaan la joogo dameerteennu meel kastoo ay joogtay waxay raacday dhaankii galbeedka, wixii galbeedku sameeyo ayaa saxan, wixii uu aammino ayaa saxan, sabab? Waayo way naga caqli badanyihiin!

Galbeedkii aan daba joognay ilxaadka ayaa ku faafay, sababo ayaga u gaar ah oo aan hadda annaga na khusayn awgood. Annagana maxaad naga sugaysaa? Uma baahnin inaan baarno ilxaadku ma saxanyahay? waayo galbeed oo naga caqli badan ayaaba qaatay! Ma Hawking baad adigu ka caqli badantahay? Oo ka cilmi badantahay? Heerkaaga aqoonso wiilow/gabarey.

ورحم العدم من عرف قدر نفسه!!!

Laakin nasiibdarro, galbeedka aan sidaas u weynayno nala kuma karo meesha ay nooga horreeyaan inaan uga dayanno, oo awood iyo aalad samaysanno, inta liidata ayaan uga dayannaa, meelaha ay ka dhinteen oo ayagiiba ay ka cabanayaan ayaan soo minguurinnaa! Sidatoo ay intaas xun horumarka ku gaareen!

Sababka toddobaad: Salfudayd iyo suul-eegnimo (السطحية الفكرية)

Waxaa jira dad fikir kasta oo ay qaataan aan hoos ugu degin, waxa uu ku dhisanyahay, waxa ka dhalanaya, iyo waxa xujo u ah ee lagu difaaco midnaba. Dadkaasi waa dad ay ku adagtahay dhex muquurashada afkaaraha isasuran (Complex) iyo kala saarsaaritaanka masalooyinka isku milan. Waxay jecelyihiin dulsabbaynta iyo xantabeebsiga afkaarta dibadyaalka ah ee aan sii qodnayn.

Maxaa lagu gartaa dadkaas? Waxaa lagu gartaa inay maalinba god ka soo jeedaan. Shalay Suufi buu ahaa, xalay buu wahaabi dhexdhexaad ah noqday, maanta wuxuu ku sii harsanayaa asagoo wahaabiyada fog ah (Takfiir ama Alshabaab), wuu sii gudbayaa Calmaani buu noqonayaa, berrina waaba mulxid!

Qofkaas cilladdiisu —marka aqoonyarida laga soo tago— waa dibadyaalnimada, koox kasta oo uu ku biiro afkaartooda hoos uma gali karo, mana jeclaba kala furfuritaanka isasuranta! Sidaa darteed hal fadhi oo aad la qaadato ayaad dhanka kale u rogi kartaa, saa awelba xididdo uma aasnayne. Ilxaadkuna inta badan qofka sidaas ah waa meesha keliya ee hayn karta! Waayo ilxaadku waa afkaar fudud, aan wax isasuran lahayn, misna aan caqli u baahnayn oo qof kasta uu fahmi karo (Wixii aanan anigu u jeedin ma jiraan) intaas qof kasta ayaa fahmi kara. Waana sababta Christian B. Anfinsen ka keentay inuu yiraahdo: *“I think only an idiot can be an atheist*” Malaha doqommada keliya ayaa mulxiddiin noqon kara!” Sidaa darteed ayuu Dr. Haytham Dalacat kitaabkiisa "الرد على الملحدين العرب" wuxuu boggiisa koobaad ku qoray halqabsigaan *“Ilxaadku waa xukun dibadyaal ah oo wehsi ku dhisan, oo go’aan looga gaarayo arrin gundheer oo adillo ka cokan, ilxaadku ma ahan xal, ee waa qirasho xal-weyto”*

Iimaanku waa arrin xeeldheer, waa tafsiirka jiritaankeenna iyo jiritaanka koonka oo dhan, waa fahanka nolol iyo geeri, waa fahanka khayr iyo shar, waa fahanka shakhsiyaddaada, ilxaadkuna

waa inaad intaas oo dhan is moodsiiso, ka dibna BBC iska dhegeysato, waa inaad qaylada gudahaaga ka yeeraysa xabbad sigaar ah ku damiso! intaasina caqli iyo fikir uma baahna.

Sababka siddeedaad: Culimmada!

Culimmadeennu way dadaaleen khayr badan Alle ha siiyo, balse waxaa muuqata furimo badan oo la banneeyay muhiimna ah. Furimahaas waxaa ka mid ah:

1. Dhexgalka bulshada: qofka raba inuu bulsho arrimaheed ka hadlo waxaa lamahuraan u ah inuu bulshadaas si fiican u fahansanyahay. Waxaa jirtay beri nolosha caadiga ah ee bulshada haddii aad ku dhex jirto aad bulshadaas fahmi kartay, nolosha baraha bulshaduna khiyaali ahayd, balse maanta nolosha baraha bulshada ayaa dhab ah, ayada ayaana wejiga runta ah ee bulshada daaha ka faydaysa, nolosha caadiga ahina waa dhalanteed! Laakin culimaddeenna badankood labada meelood midnaba bulshada kuma dhex jiraan! Oo nolosha caadiga ah waxay ku egyihiin masaajidda, xerta ay wax u dhigaan iyo guryahooda, baraha bulshadana ma adeegsadaan, ardaydoodana way kala dagaallamaan inay baraha bulshada galaan ama TV daawadaan! Sidaas oo ay tahay bulshadaas aysan warba isu hayn arrimaheeda ayay ka hadlaan, taas oo marar badan u keenta inay noqdaan dad lagu jeesjeeso, ayadoo ay u wacantahay macluumaad aan saxnayn oo loo geeyay!! Taasina waxay bixinaysaa muuqaal khaldan oo isku xiraya barashada diinta iyo dibudhaca qofka! Qof kasta oo diinta barta wuxuu u ekaanayaa qof ummadda ka danbeeya oo aan war iyo wacaal hayn, haddaba diintu waa dibudhac ayaa ka dhalanaysa!

Haddii culimadii salafku ardayda diinta barata kala dagaallami jireen inay u muuqdaan dad jilicsan oo aan waxba iska dhicin karin, haddii ragga qaar beri lagu dhaleecayn jiray inay dhar dufan leh xirtaan, oo ay diinta iyo barashadeeda foolxumeeyeen, waxaa intaba ka sii foolxun in qofka wacyigiisu hooseeyo, waxa dhacaya iyo meesha la marayana uusan ka war hayn.

2. Tusaale u noqoshadii: qofka bini aadanka ahi mar walba waxaa qasab ah inuu leeyahay qof uu ku daydo, qof wanaagsan oo uu ku daydo haddii uu waayo qof xun buu ku dayanayaa. Xaddiisku waa kii ahaa: "*Cilmiga Ilaahey hal mar qalbiga culimada kama siibayo, ee culimada ayaa mid mid loo qabanayaa, markii hal caalim la waayo dadku waxay samaysanayaan horjoogeyaal jaahiliin ah, markaas bay u fatwoonayaan, say luminayaan, ayana lumayaa"* u fiirso, haddii qofkii lagu dayanayay "Qudwah" uu meesha ka baxo, dadku meel cidlo ah soo dhici maayaan, qof kale ayaa lagu caano shubayaa si ogaal la'aan ah. Kala miirnaanta culimada iyo bulshada inteeda kale waxay keentay in dhaqanka diintu noqdo wax dhegta laga maqlo keliya oo ficil ahaan cid u aragtaa ay yartahay, dadkuna ficilka ayay qaadan ogyihiin, warku meel uusan gaarin buu ficilku gaaraa. Markaas waxaa lagu qasbanyahay in cid cusub la caleema saarto culimadii oo nool!! [1]

3. Ka hadal la’aanta afkaarta doolka ah: ha la soo boodin hebel iyo hebel baa ka hadlay, ee waxaad qiimaysaa mawduuca miisaankiisa iyo dadaalka la galiyay! Mawduuca ilxaadku xataa shirkiga wuu ka xunyahay, sidaas oo ay tahay cid xil iska saartaa way yartahay. Dedaalka bandhig faneedyada la galiyay mid leeg xataa haddii la galin lahaa wax tar bay ahaan lahayd.

4. Culimadeenna xataa kii baraha bulshada adeegsada Af-soomaali wax uguma sheego dadkiisa, ee carabi ayuu wax ku qoraa!! Dhawr culimo ayaa halkaan iigu jirta, qofkii aan aqoon u lahayni kama shakinayo inay carab yihiin! Hadde ogow carabiga lama dagaalsani, degdeggiinnaan aqaane, balse dadkeenna ayaa aqoontaas carabta loo qorayo u baahan.

Sababka sagaalaad: miisaanka masalooyinka.

Masalooyinka diintu ma sinna derajo ahaan, qaar baa qofkii diida diintaba uga baxayaa, qaarna bidco ayay gaarsiinayaan, qaarkoodna waa masalooyin khilaaf aqbali kara, culimadii horena ay ku kala aragti duwanaayeen. Balse dadkeenna badankood oo aan kala sooci karin heerarka masalooyinka awgeed, waxaa marar badan dhacda in qof masalo khilaaf tirsi lihi ku jiro **(معتبر)** uu qaato qawl aan deegaankiisa laga aqoon, qofkaas hankool baa lagu qabtaa, qof fongor ah oo Alle iyo rasuulba la diriray ayaa loo aqoonsadaa, haddii culimadiisu joogaan waa lagu diraa, haddii kalena waalidkiis iyo bulshada ayaa laga horkeenaa! Sida taakadaas loogu hayo ayuu qofku marka danbe asaguba iska shakiyaa inuu gaal yahay, inuu sii fogaado oo masalooyin badan ku sii balballaarto ayuu bilaabaa, ka dibna asagoo dayro ah ayaa dhanka kale laga soo dhoweeyaa, bal qiyaas qof shan sano hankool lagu hayay hadduu tago meel aqoonyahan bisil looga yaqaan? “Sheekhanaa” sida loogu hayo, ayuu is arkaa asagoo muftiga mulxiddiinta ah.

Intaas ayaan ku soo gaabinayaa sababaha ilxaadka keena. Sababihii u waaweynaa ayaan soo qaatay, kuwo yaryar oo badanaa kuwaan soo hoos galaya ayaa jira waan ka gudbay.

Sidii aan horay uga afeeftayna, sababaha aan soo taxay macnaheedu ma ahan qof kasta oo mulxid noqda inay ku kulmeen sababahaani, ee qof baa hal sabab laga heli karaa, midna labo iyo ka badan, qaarkood sababo kuwaan ka baxsan.

Dibumilicsi sooyaalka ilxaadka

Qormadaan gaaban waxaan isku dayi doonaa inaan jawaab kooban ka bixiyo labadaan su'aal:

1. Waa maxay ilxaadku sidiisaba?

2. Waa maxay ilxaadka cusubi?

Erayga ilxaad *(Atheism)* bariga iyo galbeedkaba waa eray isbedbeddel badani ku dhacay, marxalado badan soo maray, hadba wax loo aqoon jiray, ugu danbayna maanta wixii hore wax ka duwan loo yaqaan. Bariga haddaan nimaad, culimadii hore ee islaamku waxay ilxaad u yaqaanneen inkiridda sifaatka Alle, ama ilaahnimadiisa, ama daryeelkiisa iyo maammulkiisa *(Divine Providence)*, ama inkiridda aakhiro in qofka jir ahaan loo soo noolaynayo, ama inkiridda in Ilaahey rusul soo diro.

Galbeedku ayagu berigii hore qof kasta oo waxa bulshadiisu aamminsantahay ka baxa mulxid bay u yaqaanneen, ayadoo laga yaabo in bulshadiisu dhagxaan caabbuddo asaguna uu Allaha weyn keliya aqoonsaday!

Haddase ilxaad waxaa loo wada yaqaan "Inkiridda jiritaanka Alle" Berigii hore lama aqoon ummado dhan oo jiritaanka Alle inkirsan, waxaase la arki jiray hal hal faylasuuf oo qol ku jira, oo jiritaanka Alle inkirsan, badanaana aan muujisan karin, sida la sheegana waxaa soo bilaabay falaasifadii dabiiciyiinta loo yaqaannay ee Suqraad ka horreeyay (490 B.C).

Ilxaadka cusub (New atheism)

Mulxiddiintu waagii hore waxay ahaayeen kuwo aan diimaha xil badan iska saarin, la dagaallanka diimahana aan waqti iyo xoolo badan ku bixin. Hayeeshee, 2001 - 11 - September maalinkii saraha Maraykanka la qarxiyay ayaa neerfayaasha mulxiddiintuna la qarxeen, daqiiqaddii uu madaxweynaha Maraykanku ku dhawaaqay dagaal Muslimiinta ka dhan ah bay ayaguna ku dhawaaqeen dagaal diimaha ka dhan ah, ayagoo ku andacoonaya in diimuhu halis ku yihiin nolosha aadanaha, ayna horseedi karaan dagaallo ba'an oo lagu hoobto, sidaa darteedna ay lamahuraan tahay in la ciribtiri. Maalinkaas wixii ka danbeeyay waxaa si talantaalli ah isu soo raacraacay hirar buugaag, filimmo, website-yo, iyo ururro diimaha lagula dagaallamayo ah, waana

hirkaas hirka uu markii danbe Jiri Wolf ugu wanqalay *“New atheism= Ilxaadka cusub”* maqaal uu 2006-dii ku qoray majallada Wired.

Ka dib waxaa soo shaac baxay nimanka loo yaqaan afarta gaandheri ee mulxiddiinta *(four horsemen)* waa Sam Harris, Richard Dawkins, Daniel dennet, iyo Christopher Hitchens. Gaandherigii u horreeyay ee u dagaal gala wuxuu ahaa Sam Harris, maalintii saraha la qarxiyay maalintii ku xigtay (12 Sep) ayuu bilaabay qorista buuggiisa *"End of faith= dhammaadka iimaanka"* sida uu asaguba dhammaadka buugga ku sheegay. Wuxuuna soo saaray 2004-tii. Buuggaas oo uu si guud diimaha ugu dhaleecaynayo, wuxuu si gaar ah diiradda u saaray Islaamka! Chapter gaar ah ayuu Islaamka u sameeyay *(Problem with Islam)* waana chapterka ugu dheer buuggiisa! Wuxuu tilmaamay in Muslimiinta jiritaankooduba halis ku yahay aadanaha.

Sidoo kale, Richard Dawkins oo gaandheriga labaad ah, ayaa maalintii qaraxu dhacay afar maalin ka dib maqaal ka qoray dhacdadii, maqaalkaas aakhirkiisa ayuu ku leeyahay: *“Caalamkaan in diin ama diimo laga buuxiyo waxay la mid tahay in waddooyinka bastoolado rasaasi ku jirto laga buuxiyo, layaab ma leh haddii la isticmaalo!”* Sidoo kale kalimad uu 2008-dii jeediyay oo youtube ku jirta, oo uu ku magacaabay "Militant Atheism= Millitariga ilxaadka" ayuu ku soo gabangabaynayaa: "Dadka qaar baa is weyddiinaya: sidee bay kuu beddeshay dhacdadii 11/Sep? Waa sidaan sida ay ii beddeshay: Aan joojinno ixtiraamka nacaladda ah ee iska yeelyeelka ah ee aan diimaha u muujinayno"!

Richard Dawkins wuxuu sidoo kale 2006-dii sameeyay Filim uu ku magacaabay *"Root of All Evils= Jiridda shartoo dhan"* oo uu diimaha ula jeedo, ka dibna wuxuu raaciyay buuggiisa caan baxay *"The god Delusion= Ismoodsiiska Ilaahey"*.

Ninka xigay waa Daniel dennet oo 2006-dii qoray buugga *"Breaking the spell= Sixir-fur"* Kaas oo uu ku metelayo oday caaqil reereed ah oo inuu wax kala maslaxo doonaya, asagoo dadka diimaha haysta ku tilmaamay inuu yihiin dad wacyi la’aan iyo aqoondarro hayso, ayna tahay in diimaha tafsiir maaddi ah loo raadiyo.

Ninka ugu buug danbeeyay afartooda waa Christopher Hitchens, wuxuu 2007-dii qoray buug uu u bixiyay *"God is not great= Alle ma weyna"* kaas oo nuxurkiisu ku wareegayo in diimuhu yihiin shar kasta asalkeed.

Afarta buug waxyaalo guud oo ay wadaagaan ayaa jirta.

1. Marka hore mawduucii jiritaanka Alle ee ay dooddu ku saabsanayd midkoodna ma daawaynayo, ee sharta diimaha, dhibka Muslimiinta iyo waxyaalo la mid ah ayay ku wareegayaan.

2. Marka labaad, badankood ciwaannadoodu waa caay! "Sixir, ismoodsiis, Alle ma weyna"!

Labadaas tilmaan ee buugtii u horraysay ay ka sinnaadeen ayaa ilxaadka cusub bar lagu yaqaan oo u gaar ah noqotay, meel kasta oo aad ku aragto qof mulxid ah wax uu aamminsanyahay oo uu difaacanayo ma jiraan, ee shaqadiisu waa inuu caayo diintii uu ka tegay! “Tan inay khaldantahay kaba soo qaad, adigu waxa aad aamminsantahay saxnimadooda caddee” Ha ka yaabin!!

Waxaa jirta labo fikrad oo ilxaadka la walaalo ah, kuna feer socota, oo saddexdooda hal magac loo wada yaqaan. Saddexdoodu waxay kala yihiin:

1. Atheism إلحاد (Alle-diid): oo ah midka aan ka soo hadalnay oo jiritaanka Alle diidaya.

2. Deism الربوبية (Nebi-diid): oo ah in qofku jiritaanka Alle aammino, balse uu diido in Alle rusul soo diray, waxay qabaan in Alle markuu koonka abuuray uu faraha kala baxay.

3. Agnosticism لاأدري (dhexyaal): waa qof “Alle wuu jiraa” iyo “Ma jiro” midna aan aamminsanayn, oo dhahaya dhexdhexaad baan ka ahay hawshaan, ama aamminsan inaan arrintaas xaqiiqadeeda la gaari karinba!

Saddexdaas ayaa la isku yiraah “Irreligious= diinlaawe”.

Ismuujinta mulxiddiinta

Dacwada ilxaadku waa dacwo ay ka shaqeeyaan ururro dowli ah, Caalami ah, oo si wadajir ah u shaqeeya, tusaale mu’asasaadkooda waxaa ka mid ah:

1. Atheist Alliance International

2. Atheist Nexus

3. Richard Dawkins Foundation for reason and science

4. International humanist and Ethical Union

Iyo kuwo kale.

Maalintii mawjaddoodu qaraxday iyo maanta inta ka dhex leh mulxiddiintu waxay dadaallo aan yarayn u galeen in fikirkoodu faafo, ama ugu yaraan ay adduunka ka dhex muuqdaan, dadaalladaas meelaha la galiyay waxaa ka mid ah:

1. Filimmada.

Mulxiddiintu waxay ku dedaaleen inay filimmada ku gudbiyaan afkaartooda, wayna ku guulaysteen, filimmada qaar ayay ujeedkaas oo keliya u sameeyaan, filimmada qaarna wax yar oo aan aad loo dareemi karin ayay ku dhex milaan, tusaale filimmada ay aadka uga dhex muuqdaan waxaa ka mid ah:

The Man From Earth, Contact, whatever works, The sunset limited, Agore, Paul, The Invention of lying iyo kuwo kale.

Tusaale filinkaan u danbeeya *"The Invention of lying"* waxaa daadihinaya Ricky Gervais oo mulxid macruufa ah, wuxuu filinka ku metelayaa nin dhallinyaro yaro ah oo ku dhex nool bulsho aan wax been la yiraah aqoon, weligood dhegtoodu ma maqal wax been la yiraah, wax kasta oo ay maqlaan waa run, waa nin dhallinyaro ah oo nolol adag ku nool, dadku aysan jeclayn, misna shaqadiisii laga soo burinayaa, kiradii guriga ayaa ku go'aysa, gurigii baa laga saarayaa, ka dibna intuu meelahaas ku dayacnaa ayaa si uu lacago u helo wuxuu baranayaa been, wuu helayaa lacagtii, guri buuna degayaa. Ka dibna hooyadiis ayaa xanuunsanaysa, waxaa loo sheegayaa inaan xanuunkeeda waxba laga qaban karin oo ay caawaba dhimanayso. Wuxuu arkayaa hooyadiis oo dhimashadii ka welwelsan, ka dib si uu cabsida uga baabbi'iyo waxaa ku soo dhacaysa inuu been u sheego. Wuxuu ku leeyahay: nolol raaxo leh ayaa kaa danbaysa iyo janno, aabbe ayaad la kulmaysaa iyo asxaabtaadii. Maamadii baa farxaysa oo cabsidu ka tegaysaa, sidii bayna ku dhimanaysaa ayadoo faraxsan. Dhakhtarkii iyo kalkaaliyeyaashii isbitaalka joogay ayaa warkaas maqlaya, way rumaysanayaan, —saa dad been yaqaanba ma ahane— warkii baa magaalada ku faafaya, markuu gurigiisii ku laabto wuxuu arkayaa boqolaal qof oo bannaanka u taagan oo doonaya inay warkaas ka toydaan! Qolkiisa ayuu galayaa, wuu u fekerayaa qaabkii uu dadkaan uga dhaadhicin lahaa noloshaas danbe, wax yar ka dib wuu soo baxayaa, dadkii buu u khudbaynayaa asagoo ku dhahaya: marka koobaad nin ayaa cirka jooga, adduunkaanna asaga ayaa maammula, wax kasta awooddiisa ayay ku dhacaan, ninkaas ayaa aniga ila soo xiriiray, asaga ayaan ii sheegay arrinta nolosha danbe, ka dib wuxuu u tirinayaa 10 dardaaran oo jannada lagu gali karo naartana looga badbaadi karo!!

Sidaas ayaa laguugu soo gudbiyay in jiritaanka Alle iyo aakhiraba ay yihiin been la dhoodhoobay oo dadka lagu sasabayo, dadka qaarna inaysan ku baraarugin in fikrad la gudbinayay ayaa laga yaabaa, oo ay sheeko caadi ah u qaataan.

Sidoo kale waxaa jira filimmo kartoon ah oo carruurta loogu talogalay oo afkaarta ilxaadka faafinaysa, sida: Happy Feet, Kaena: The Prophecy Iwm.

Maadaama in badan oo ka mid ah dadka filimmada sameeya iyo kuwa jilaba ay mulxiddiin yihiin, dadyowga diimaha kale haysta waxay samaysteen meelo filimmada lagu gorfeeyo, oo lagu faafreebo wixii dhaqanka iyo diinta ummaddooda u cuntami kara iyo wixii kale. Sida websiteyada Kirishtaanku leeyihiin ee kala ah: movieguide.org

Crishtiananswers.net/spotlight

Crosswalk.com/culture/movies

Muslimiintuse inaysan lahayn baan filayaa cid ka gorfaysa waxa ay daawanayaan.

2. Boorarka iyo dharka.

Mulxiddiintu maadaama ay yaryihiin markii caalamka loo fiiriyo, badanaa way is qarin jireen sanado ka hor, ilaa maantana is qarintaas meelaha qaar wax baa ka sii danbeeya, sidaa darteed ayaa Mu’asasada aan horay usoo sheegnay ee Richard Dawkins Foundation for Reason and Science (RDFRS) samaysay olole ay ugu magac dartay *"The out Campaign= Ololaha bannaan usoo bixidda"*, ayadoo dadka mulxiddiinta ah ugu baaqday in ay bannaanka is keenaan, joojiyaan cabsida iyo is qarinta, ay xirtaan koofiyaha iyo fanaanadaha ay ku qoranyihiin xarafka A oo laga soo gaabiyay "Atheist"

Richard Dawkins oo ah ninka ololahaan bannaan usoo bixidda ah keenay ayaa si caloolxumo leh wuxuu ku leeyahay buuggiisa *"The god delusion"*: (Riyadeyda qurihi waa in kitaabkaani ka qaybqaato in dadkaygu bannaanka is keenaan, sida qowmuluudkuba isu muujiyeen, mar walba oo dadku ay noqdaan dad muuqda, dadka kale ayay ka caawinaysaa inay ku soo biiraan).

Intaani muhiim uma ahan taariikhda ilxaadka, balse waxay muhiim u tahay baraaruggeenna, si aan iskaga hubinno waxa aan daawanayno iyo waxa carruurteennu daawanayaan. Maanta fikir kasta oo la faafinayo dhar baa loo soo xiraa, meel aan laga filanayn baana la soo mariyaa. Daawashada waxyaalaha qaar adigu ma dareemi kartid waxa ay kaa beddeleen, ayadoo laga yaabo inay habfikirkaaga wax ka beddeleen, habfikirkaas ayaana toos kuu geynaya boosteejadii lagaa rabay.

F.G. Koofida iyo fanaanadda aan sheegay ma ahan wax male-awaal ku dhisan iyo aragtidii shirqoolka ee waa wax ay ayagu samaysteen websiteyadoodana soo dhigeen.

Dad naga mid ah ayaa waxay isku dayaan in ay Mulxiddiinta noogu sawiraan in ay yihiin dad si edeb leh wax u naqdiya, aragtiyaha ka soo horjeeda ixtiraama, wadanoolaansho oggol oo aan nacayb iyo cunfi aqoon. Taasina waa dacaayad ay ayaguba iska fogeeyeen, sidaan arki doonno.

Sidaan horay usoo sheegnay mawjadda ilxaadkuba waxay la qaraxday qarixii sarihii Maraykanka, sidaa darteed mawjaddaani waa mawjad xanaaq ku salaysan, wayna adagtahay qof xanaaqsan inuu si edeb leh u hadlo. Magacyada ilxaadka cusub loo bixiyay ayuuna ka mid yahay *"Ilxaadka xanaaqsan"* Waxaa xanaaqaas la socda in ilxaadku yahay "Mucallal" ee uusan ahayn "Mudallal", waa mucallal oo "Cilladdaas iyo cilladdaas baan diimaha ku nacnay" buu ku dhisanyahay, ee ma ahan mudallal "Daliilkaas iyo midkaas baan u haysannaa saxnimada ilxaadka". Qofka matalan Muslimka ah, intuu masaajid ka istaago ayuu diintiisa ka hadli karaa asaga oo aan hal mar soo hadalqaadin diimaha kale iyo diinlaaweyaashaba. Balse Mulxidka way ku adagtahay inuu ilxaadkiisa ka hadlo asaga oo aan diimaha soo hadalqaadin.

Xanaaqii mawjadduba ka qaraxday wuxuu keensaday nacayb faro badan. Ilxaadkii oo xujadiisa ugu weyni cayda diimaha tahayna waxay keensatay afxumo faro badan. Nacaybkaas iyo afxumadaas oo noqday calaamad aan ilxaadka cusub laga sooci karin ayaan tusaaleyaal ka soo qaadanaynaa.

Nacaybka

Si aad u ogaato hanaayada ay diimaha u qabaan inta ay qodantahay, waxaad fiirisaa sawirka hoose, waa Richard Dawkins oo xiran fanaanad ay ku qorantahay: "Diinta… Si wadajir ah ayaan xal ugu heli karnaa" dabcan xalkaasna sida uu meelo kale ku sheegay, waa in adduunka laga ciribtiro. Waraysi laga qaaday oo youtube ku jira ayuu ku leeyahay: *"Dhabtii, dhabtii anigu waxaan jeclaan lahaa inaan arko diimaha oo hal mar adduunka ka dabargo'ay"*

Sidoo kale, Sam Harris ayaa asagoo isla macnahaas cabbiraya yiri: *"Haddii aan haysan lahaa ul sixir ah oo ii suurtagelinaysa inaan diimaha iyo kufsiga midkood adduunka ka ciribtiro, kama labalabeeyeen inaan diimaha ciribtiro!"*

Mar kale ayuu leeyahay asaga oo diimaha ka hadlaya buuggiisa The End of faith: *"Masalooyinka qaar waa halis, heer ay gaarayaan in qofkii aamminsan akhlaaq ahaan loo dilo= Some propositions are so dangerous that it may even be ethical to kill people for believing them"* aan kuugu sii daree, ninka sidaas u hadlaya waa Libraali xorriyadda aamminaadda u ololeeya! Halkaanna dil buu gaarsiinayaa waxyaalaha qaarkood qofkii aamminsan!

Afxumada

Waxaan qoraalladii hore ku soo marnay Dawkins oo dhahaya: *"Aan joojinno ixtiraamkaan nacaladda ah ee aan diimaha u muujinayno"* Ixtiraamkii nacaladda ahaa joogsay, nin walba oo mabda' lahaana mabdi'iisii muujisay.

Sidaa darteed waxay in badan Mulxiddiintu u doodeen in aflegaaddada iyo cayda diimaha caadi laga dhigo, maadaama ay tahay wax aysan innaba ka maarmi karin, waa tii Mulxidaddii Soomaalida ahayd Ayaan Xirsi qortay maqaal ay ku magacawday *"The right to Offend= xaqa aflegaaddeynta"* kaas oo ay ku doodayso in aflegaaddada diimuhu tahay xaq ay leeyihiin.

Labada qoraa ee isla qoray buugga *Answering the new Atheism* Scott Hahn and Benjamin Wiker ayaa sidoo kale ayagoo iclaaminaya wax edeb-u-hadal la yiraah in ay waa hore isdaayeen yiri: *"Wuu dhammaaday waqtigii ilxaadka edebta leh"*

Mar kale, Richard Dawkins oo muxaadaro jeedinaya ayaa asagoo ardaydiisa u sheegaya sida ay diimaha ula dhaqmayaan ku yiri*: "Ku jeesjeesa, u caaya si public ah, ha ku sirmina warka magaalada na loo galiyay ee ah inaan dad edeb leh nahay marka aan diimaha ka hadlayno!"* Waa kan warkiisii oo aanan waxba ka beddelin: "Mock them, ridicule them in public, don't fall for the convention that we're all too polite to talk about religion" Intaa marka uu leeyahay qosol iyo sacab ayaa is qabsanaya goobta oo dhan! Haddii aad la yaabbantahay link-ga ayaan ku siinayaa soo dhegeyso.

Waxaan soo xusuustay hadalkii Faysal Cali Waraabe "Faysbuugyada ku caaya" kkkk.

Dood dhex martay Richard dawkins iyo John Lennox oo jiritaanka Alle ku saabsanayd ayaa mid ka mid mulxiddiintii dooddaas ka faallootay wuxuu leeyahay: "Anigu hadda waxaan aamminay waxa ugu fiican ee aan samayn karno inay tahay inaan ku qaylinno, waxaad tihiin doqommo, waxaad tihiin nacasyo, waxaad tihiin dabbaallo"

Islaamka si gaar ah

Sidaan wada ognahay dhacdadii 11/sep ee Mulxiddiinta kicisay waxaa ka danbeeyay rag Muslimiin ah, sidaa darteed colaadda ay Islaamka u qaadeen way ka badantahay midda ay diimaha kale u qaadeen. Waa taan soo aragnay buugaagtii ugu horraysay ee gaandheriyadoodu qoreen inay baalasha ugu badan islaamka ka siiyeen. Sida Harris oo chapterka buugga ugu dheer Islaamka keliya uga hadlaya, chapterrada kalena Islaamka iyo diimaha kaleba uga hadlaya. Sidoo kale, Hitchens oo asna buuggiisa ku magacaabay *"God is not great"* asagoo si toos ah u caraynaya Muslimiinta oo uu ka maqlay eraygaa mid liddi ku ah "أالله أكبر".

Taas marka laga soo tago, waxaa jira erayo cadcad oo ay Islaamka ka dheheen raggooda ugu waaweyn. Sida Dawkins oo asagoo bogaadinaya ninkii sameeyay filinkii "*Fitna"* ee Islaamka lagu durayay, yiri: "Dhanka filinka Fitna, waxaan kuu saarayaa salaan sharaf uu mutay nin geesi ah oo hor istaagay cadaw dalqal ah".

Mar kale, asagoo ka hadlaya cabsida dadka qaar ka qabaan inay faafiyaan sawir gacmeedyada Islaamka iyo nebiga loogu gefayo ayuu yiri: "Macquul inaan doonistaada kuu yeelo oo aan diido faafinta sawirradaas anigoo ka baqaya mooryaannimadaada, laakin marnaba yaysan niyaddaada ku soo dhicin inaan ixtiraam kuu hayo, kuma ixtiraamayo, waan ku yasayaa"

Mar saddexaad, kitaabkiisii Quraanka oo kale u noqday Mulxiddiinta *"The god delusion"* ayuu asagoo gabdhaha Muslimaadka ah ee xijaaban ku jeesjeesaya leeyahay: "Mid ka mid ah muuqaallada aan lagu farxaynnin waa in maanta waddooyinkeenna lagu arko mukusha haweeney maro madow oo qaablaay ah ku duuduuban madax ilaa majo, oo caalamka duleel yar ka soo fiirinaysa"

Mar afraad, qoraalka hoos ka muuqda oo uuu twitter soo dhigay ayuu leeyahay: "Sidaan filayo Islaamku waa awoodda sharta ee maanta adduunka ugu weyn, marar badan ayaan cod dheer ku sheegay arrintaas.."

Kaasi waa Dawkins, wax badan buu reebtay marka loo fiiriyo Sam Harris, ninkaan danbe waxaad mooddaa inuu leeyahay sidii Dawacaba tiri:

- **"War anigu dayaan ahay**
- **Dayo Calina waan ahay**

- **Wax la dadana ma aqaan**
- **Farta boogta aan daro**
- **Haddii kale isii daa**
- **Naylaa dibboodee!"**

Hadalladiisa sariixa ah waxaa ka mid ah, mar uu leeyahay: "Waxaa la gaaray waqtigii aan qiran lahayn in aannan annagu argaggixiso la dagaalsanayn, ee aan Islaamka la dagaalsannahay!" Mar kale ayuu hadal ka ag dhow leeyahay: "Annagu waxaan si gaar ah ula dagaalsannahay aragtida uu Quraanku nolosha ka siinayo Muslimiinta. Ma dhahayo Muslimiinta oo dhan baan la dagaalsannahay, balse hubanti waxaa ah in aan la dagaalsannahay malaayiin Muslimiin ah oo aan wax xiriir ah la lahayn Alqaacidda"

Mar kale ayuu maqaal kale ku leeyahay: "Waa inaan beegsanno Muslimiinta, ama qof kasta oo u eg inuu Muslim yahay, waana inaan arrinkaas daacad ka noqonno"

Waxaa intaas oo dhan ka sii daran, maalintii la sameeyay sawirradii nebiga scw lagu aflegaaddeynayay oo ku aaddan 30-ka September Mulxiddiintu waxay ka dhigteen maalin ciid iyo farxad! waxay u bixiyeen "*blasphemy day= Maalinta gaalnimada!".*

Si aanan caddaaladda uga tegin, way jiraan dad Mulxiddiin ah oo aragtiyahaas nacaybka iyo afxumada ah ka soo horjeestay, magaca *"Ilxaadka xanaaqsan"* na ayaga ayaa bixiyay. balse dadkaan aan soo qaatay waa culimadoodii ugu waawenayd, mar haddii culimadoodu ku ijmaaceenna ardayda khilaafkoodu tirsi ma leh baan filayaa. Waadna tirsan kartaa.

Qormadaan waxaan uga danleeyahay, inaan muujiyo wada noolaanshaha iyo niicda ay dadka qaar facebook la wareegayaan inay tahay jacayl aan lala wadin.

Sidoo kale inaan ogaanno qof kasta oo wax si dhab ah u aamminsan in uusan ka mujaamalayn karin, qofku waxa uu ka mujaamalayn karaa oo keliya wixii uusan saxnimadooda si dhab ah ugu qanacsanayn.

---

[1]. Richard Dawkins keeps making new enemies.

[2]. the temple of reason.

[3]. https://youtu.be/Dq7rHRplZKU Daqiiqadda 24:40 ilaa 25:00

[4]. Debate between Richard Dawkins and john lennox.

[5]. The fourhorsemen part2.

[6]. The god delusion 362

[7]. Mired in a religious war.

[8]. Bombing our Illusions

[9]. In Defense of profiling.

[10]. Macluumaadkaan badankood waxaad ka heli kartaa kitaabka Eng. Sheekh Cabdalla Al-Cujeyri ميليشيا الإلحاد